



Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya wuxuu si cad u damaanad qaadayaa Xuquuqda Muwaadiniinta, cutub ka labaad ee Dastuurka oo ka kooban 31 qodob oo kala ah qodobka 10'AAD ilaa Qodobka 41AAD ee Dastuurka wuxuu damaanaq qaadayaa Xuquuqaad aasaasi ah sida

Karaamada Aadanaha, Sinaanta, Dhaqangelinta Xuquuqda Aasaasiga ah, Xaqa Noloshu, Reebista Adoonsiga, iyo ku shaqaysiga khasabka ah, Xoriyada shaqsiga, Xoriyada Fikirka, Xoriyada Dhaq dhaqaaqa, socodka & Deegaanka, Xurmada Hoyga, Xoriyada shaqada & mihiinada, Xoriyada ka qaybgalka siyaasada, xuquuqda qoyska, daryeelka caruurta, Xuquuqda Waxbarashada, Xaqa dacwada Iyo Isdifaaca & Xuquuqaad badan oo aasaasi ah ayuu damaanad qaadayaa Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyada Federalka ah ee Soomaaliya.